

XUQUUQDA SHAQAALAHA EE WAAFAQSAN SHAQOYINKA BOSTON, MUSHAHARKA NOLOSHA, & XEERKA MUSHAHARKA GUUD

Shaqooyinka Boston, Mushaharka Nolosha, iyo Xeerka Mushaharka guud waxa uu waajibinayaa qiimaha mushaharka oo gaar u ah shaqaalaha u qalma Magaalada Boston qandaraasyada adeega, qandaraas hoosaadyada, ama qandaraasyada adeega dhismaha.

KU SAABSAN MUSHAHARKA NOLOSHA - HADDA \$18.20

Dhammaan shaqaalaha ka shaqeeya Magaalada Boston adeega qandaraasyada iyo qandaraas hoosaadyada qiimahu yahay ugu yaraan \$25,000 waa in la bixiyo mushaharka nolosha. Qadarkan mushaharku waxaa la habeeyaa Juulay kasta. Laga bilaabo 1 Juulay, 2024 mushaharka noloshu waa **\$18.20** Tan macnaheedu waxa weeye loo shaqeeyayaasha hadda waxaa loo baahan yahay inay siiyaan mushaharka nolosha shaqaalahooda ugu yaraan **\$18.20** saacadiiba.

KU SAABSAN MUSHAHARKA GUUD

Dhammaan shaqaalaha waardiyaha ah iyo ilaalida amniga ee laga shaqaaleeyaya Magaalada Boston qandaraasyada adeega dhismaha ama qandaraas hoosaadyada waa in la bixiyaa magdhowga caadiga ah iyo la isticmaalayo jadwalka qiimaha mushaharka guud. Waaxda Heerarka Shaqada (DLS) waxay soo saaraan jadwalka qiimaha mushaharka guud ee dhammaan mashruucyada mushaharka guud. Shaqaalaha Adeega Dhismaha La daboolo waxay codsan karaan jadwalka qiimaha mushaharka ka soo baxay loo shaqeeyahooda.

Si loo ogaado haddii ay ku daboosho Shaqooyinka Boston, Mushaharka Nolosha, iyo Xeerka Mushaharka Guud (Boston Jobs, Living Wage, and Prevailing Wage Ordinance), soo wac Xafiiska U hogaansanka Shaqada iyo Ilaalinta Shaqaalaha lambarka 617-918-5236.

SOO XAREE CABASHO

Shaqaalaha la daboolo waxay ku soo xarayn karaan cabsho Xafiiska U hogaansanka Shaqada iyo Ilaalinta Shaqaalaha haddii loo shaqeeyahoodu aanu u hogaansamayn shuruudaha Shaqooyinka Boston, Mushaharka Nolosha, iyo Xeerka Mushaharka Guud. Cabashooyinka Shaqaalaha La daboolay ee xad gudubyada lagu eedeeyay waxaa la samayn karaa wakhti kasta oo waxay ahaan doontaa qarsoodi.

Si loo soo xareeyo cabashada, soo wac 617-918-5236 ana wac boston.gov/living-wage.

TAKOORKA IYO AARGOOSIGA KU LIDKA SHAQAALAHA LA DABOOLU

Waa sharci daro loo shaqeeyahu inuu eryo, ka yareeyo mushaharka, ama takooro Shaqaalaha la daboolo inay soo xareeyeen cabasho ama haddii kale xaqiijinta xuquuqdooda waafaqsan Shaqooyinka Boston, Mushaharka Nolosha, iyo Xeerka Mushaharka Guud. Shaqaalaha sidaas sameeya waxaa looga fekeri doonaa inay ku xad gudbayaan xeerka oo waxaa baadhi doona Xafiiska U hogaansanka Shaqada iyo Ilaalinta Shaqaalaha.

CIQAABAHA

Haddii Xafiiska U hogaansanka Shaqada iyo ilaalinta Shaqaalaha go'aamiyo loo shaqeeyahu inuu ku xad gudbay Xeerka, ciqaabaha soo socda ayaa la amri karaa:

- Ganaaxyada qadar dhan \$300 shaqaale kasta oo mushaharka nolosha la daboolo ee maalin kasta inuu daboolo iibiyaha oo ku xad gudbaysa xeerkan.
- Soo xaraynta cabashada wakaalada gobolka ama federaalka ee khuseeya;
- Magdhowga mushahar ee shaqaale kasta oo ay saamaysay;
- Joojinta qandaraasyada joogtada ah iyo lacag bixinta qandaraas hoosaadka;
- U qalimid la'aanta ee qandaraasyada mustaqbalka Magaalada ee saddex sanadood ama ilaa dhammaan ciqaabaha iyo magdhowga loo bixiyay si buuxda; iyo
- Tallaabo kasta oo kale oo loo arko inay habboon tahay iyo oo wadata awooda iyo masuuliyada Magaalada.

Su'aalaha ama walaacyada ku saabsan Shaqooyinka Boston, Mushaharka Nolosha, iyo Xeerka Mushaharka Guud waa in loo soo diro Xafiiska U hogaansanka Shaqada iyo Ilaalinta Shaqaalaha:
43 Hawkins Street, Boston, MA 02114
workers@boston.gov
617-918-5236



Si wax badan loo ogaado, booqo boston.gov/labor-policy ama iskaan saar xeerka QR.

This notice contains information about your rights or obligations, and should be translated immediately. Translations are available at no cost. To request translation services, email workers@boston.gov.

Este aviso contiene información sobre sus derechos u obligaciones y debe traducirse de inmediato. Las traducciones son gratuitas. Para solicitar servicios de traducción, envíe un correo electrónico a workers@boston.gov.

Avi sa a genyen ladann enfòmasyon sou dwa w oswa obligasyon w, epi li ta dwe tradui imedyatman. Tradiksyon disponib san frè. Pou w mande sèvis tradiksyon, voye yon imèl nan workers@boston.gov.

本通知包含有關您的權利或義務的資訊，應立即翻譯。翻譯免費提供。要申請翻譯服務，請發送電子郵件至 workers@boston.gov。

Thông báo này có thông tin về các quyền và nghĩa vụ của quý vị, và cần được dịch thuật ngay lập tức. Bản dịch có sẵn miễn phí. Để yêu cầu dịch vụ dịch thuật, hãy gửi email tới workers@boston.gov.

Este aviso contém informações sobre seus direitos e deveres e deve ser traduzida imediatamente. As traduções estão disponíveis gratuitamente. Para solicitar serviços de tradução, mande um e-mail para workers@boston.gov.

